# Early Childhood Connector | Jiilaalka 2024

*Wargeyskaaga saddex biloodlaha ah ee ku saabsan daryeelka carruurta iyo waxbarashada hore.*

## Waxaa ku jira warsidahan


Ku soo dhawoow Early Childhood Connector ................................................Error! Bookmark not defined.**2**

Wicitaanada Early Childhood Connector ..................................................................................**2**

Dhalanrogista bixinta shatiyada daryeelka ilmaha:  Provider Hub (Shebekadda Adeegbixiyaha) ....................**3**

Toolkit for Healing-Centered Practice (Xirmo-qalabeedka Dhaqamada Daawayntu Salka u tahay) ....................**4**

Barnaamijka Child Care Aware ee Minnesota wuxu bilaabay tijaabo carbin-shaqo oo cusub ............................**4**

Haa Seegin Dheefta Canshuureedka Carruurta ee cusub! ...................................................................**5**

U wareegista Waaxda Canshuurta, Dhalinyarada, iyo Qoyska (Department of Children, Youth, and Families)....**6**

Khayraadka qoysaska, carruurta iyo bixiyeyaasha ..............................................................................**6**

Su'aalo ma qabtaa? ....................................................................................................................**7**

Wax jawaab celin ah ma haysaa? ....................................................................................................**7**

## Ku soo dhawoow Early Childhood Connector

Waad ku mahadsan tahay isdiiwaangelinta Warsidaha Early Childhood Connector! Golaha Wasiirada Carruurta ee Minnesota iyo Waaxaha Waxbarashada, Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ayaa abuuray warsidahan si ay u habeeyaan isgaarsiinta bixiyeyaasha xanaanada cunugga iyo barayaasha hore ee Minnesota. Bixiyeyaasha xanaanada ilmaha iyo barayaasha hore waxay filan karaan warsidaha rubuc biloodlaha ah iyo xoogaa cusub oo iimaylo ah. Fadlan buuxi ra'yi-ururinta ku xidhan xagga hoose warsidahan si aad noogu sheegtid sidaad u aragto waxa ku jira iyo sida aan u wanaajin karno isgaarsiinteena.

## Wicitaanada Early Childhood Connector

Saddexdii biloodba mar, maamulka gobolku wuxu qabtaa barnaamka Wicitaanada Xiriirinta oo bixiyayaasha adeegyada daryeelka carruurta iyo goobaha waxbarasha carruurnimada hore loogaga jawaabayo su'aalaha la xiriira sharciga, shatiyada, barnaamijyada, deeqaha iyo waxyaabo kale oo badan. Ujeedada wicitaanku waa in laga jawaabo su'aalaha waadixinta ee laga yaabo in adeeg bixiyayaashu qabaan. Wicitaannada waxa lagu qabanaya dhanka khadka ee WebEx, [la duubaa waxaana laga heli karaa bogga shabakadda Early Childhood Connector.]()

Macalimiinta nooc kasta ah ayaa lagu casuumay wicitaanadan. Waxaan soo dhaweyneynaa su'aalaha ka imaanaya barnaamijyada shatiga leh, xarumaha shahaadeysan, barnaamijyada laga dhaafo, bixiyeyaasha aan shatiga u haysan, qoyska, saaxiibka iyo daryeelayaasha deriska, iyo shaqsiyaadka xiisaynaya inay bilaabaan ganacsiga xanaanada cunugga.

**Nagu soo biir wicitaanka Early Childhood Connector ee xiga**

- **Taariikhda soo wacitaanka xiga:** Salaasa, Abriil 16, 2024 saacadu markay tahay 7 p.m. Central Time
- **Goobta:** Lagu marti galiyay gabi ahaanba WebEx
- **Xiriirka kulanka:** https://minnesota.webex.com/minnesota/j.php?MTID=m092fb7af42ff60c351ce2daf20cd446e
- **Ujeeddo:** Si uu gobolku uga jawaabo su'aalaha caddaynaya bixiyeyaasha xanaanada cunugga iyo barayaasha hore. Gobolku kama hadli doono cabashooyinka shaqsiga inta lagu jiro wakhtigan.
- Please **halkan ku soo gudbi su'aalahaaga.** Su'aalaha waa in la soo gudbiyaa ka hor dhacdada; ka jawaabi mayno su'aalaha tooska ah. Waxaan ku dadaali doonaa inaan ka jawaabno su'aalaha oo dhan marka uu waqtigu noo ogolaado. Fadlan soo gudbi su'aalahaaga laba toddobaad ka hor wicitaanka.

Fadlan kaydi taariikhda iyo xidhiidhka kulanka jadwalkaaga; Gobolku ma soo diri doono martiqaad kulan. Wicitaanka waa la duubi doonaa oo si ku meel gaar ah ayaa loo heli doonaa dadka aan iman karin.

Baro wax badan oo ku saabsan Wicitaanada Early Childhood Connector, oo ay ku jiraan taariikhaha soo socda, oo ku soo gudbi su'aalahaaga halkan. Waxaan rajeyneynaa inaan kugu aragno wicitaanka xiga!

## Dhalanrogista bixinta shatiyada daryeelka ilmaha: Provider Hub (Shebekadda Adeegbixiyaha)

Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (Minnesota Department of Human Services)waxay casriyaynaysaa nidaamka shatibixinta daryeelka ilmaha iyadoo loo marayo nidaamka dhanka khadka ah oo la yiraahdo Provider Hub. Boggan cusub waxa loogu talagalay inuu isku toosiyo hawlaha shatibixinta oo uu shirkadaha iyo hay'adaha bixiya daryeelka ilmaha u dedejiyo una daahfuro hawlaha.

Provider Hub waxa loo soo saaray nidaam tartiibsan; waxa Abriil 2023 lagu daahfuray xarumaha daryeelka ilmaha ee shahaadada haysta Noofeembarna xarumaha daryeelka ilmaha ee shatiga leh, taas o u sahashay inay hawlahooda shahaado iyo shati bixinta gabi ahaanba dhanka onlaynka ka dhammaystaan halkii ay waraaqo iyo boosto isticmaali lahaayeen.

Shirkadaha daryeelka ilmaha ee horey u isticmaalayay Shebekadda (Hub) waxay sheegeen inay ka heleen inay shahaadooyinkooda iyo shatiyadooda hal meel ku maamushaan oo ka cusboonaystaan hadba kooxdii ku habboon.

Bilaha soo socda, Provider Hub wuxu daahfuri doonaa Heerkii 3aad, kaas oo ay ku jiri doonaan bixiyayaasha daryeelka ilmaha ee qoysaska, Child Care Assistance Program (CCAP), diiwaangelinta iyo dibu cusbooneysiinta adeegbixiyaha, iyo websayd cusub oo lagula soconayo u hogaansanka shuruucda dadwaynaha oo beddeli doona nidaamkii Fiirinta Macluumaadka Shatiga (Licensing Information Lookup, LIL) oo loogu talagalay bixiyayaasha daryeelka ilmaha. Waxyaabaha muhiimka ah waxa ka mid ah, in bixiyayaasha daryeelka ilmuhu iska diiwaangelin karaan ama dib uga cusbooneysiisan karaan CCAP degmooyin badan iyagoo isticmaalay hal codsi.

Marka laga yimaado shatiyada, Provider Hub wuxu dhowaan taageeri doonaa Deeqaha Waxbarashada Hore, la socoshada soo xaadiritaanka iyo codsiyada Great Start Compensation Support Payment Program. Fadhi sharciyeedkii 2023 wuxu sidoo kale maalgeliyay in baaxadda laga sii ballaarayo daryeelka ilmaha laguna fidiyo noocyada kale ee shatiyada adeegyada aadamaha ee Minnesota.

Todobaadya ka horreeya daahfurka Heerka 3, cansharo iyo dhigaalo tababar ayaa lagu caawin doonaa diyaarinta adeeg bixiyayaasha. Bixiyayaashu waa inay macluumaadka iyo wararka khaaska ah ee ku saabsan daahfurka kala socdaan qaybta wararka ee GovDeliery.

Provider Hub wuxu calaamad u yahay isbeddel wayn oo lagu casriyaynayo nidaamyada muhiimka u ah daryeelka ilmah ee Minnesota ka jira! Nidaamyadan halabuurka leh waxa loogu talagalay in culayska hawlaha maamul laga yareeyo shirkadaha bixiya daryeelka ilmaha si ay awoodda u saar bixinta adeeg barbaarin iyo waxbarasho tayo leh.

Shaqaalaha Badeecooyinka Provider Hub waxa lagala xiriiri karaa ccproviderhub.dhs@state.mn.us wixii su'aalo ama jawaabo ah, sidoo kale macluumaad dheeraad ayaa laga heli karaa Websaydka Dhalanrogga Nidaamyada.

## Toolkit for Healing-Centered Practice (Xirmo-qalabeedka Dhaqamada Daawayntu Salka u tahay)

Toolkit for Healing-Centered Practice waxa loogu talagalay xirfadlayaasha la shaqeeya ama u shaqeeya carruurta uurka ku jirta illaa da'da 6 sannadood, qoysaskooda, iyo kuwa ku hawlan daryeelkooda. Waxa abuuristiisa iska kaashaday Waaxda Waxbarashada (Department of Education) iyo Ururka Caafimaadka Maskaxda Carruurta ee Minnesota (Minnesota Association for Children's Mental Health). **Xirmo-qalabeedku dhigaalo iyo kayd casharo onlayna oo loogu talagalay daryeel ahmiyad siinaya isku-buuqa iyo taroomada,** waxana loo qaabeeyay inuu buuxiyo baahiyaha ardayda kala duwan. Waxyaabaha ku jira waxa ka mid ah siminaaro onlayna, xaashiyo xogeed, liiska kheyraad iyo cutubyo tababaro ah oo la heli karo markii loo baahdo. Waxa sidoo kale ku jira dukumeentiyo loo turjumay luuqadaha Isbaanishka, Hmong iyo Soomaaliga.

Xirmo-qalabeedka waxa loo kala jebiyay saddex qaybood waxayna ka turjumayaan Nidaamka Aqoonta iyo Kartida Minnesota ugu talagashay Xirfadlayaasha Daryeelka Carruurnimada Hore:

- **Qaybta Sahaminta** - dhigaalada ama khayraadka qiimeeya saameynta isku-buuqa iyo culeysyadu ku yeeshaan carruuta yaryar, qoysaskooda iyo barbaariyayaashooda.
- **Qaybta Fulinta** - dhigaalada ama khayraadka qiimeeya qaababka carruurta iyo qoysaska loo taageero iyadoo la tixgelinayo saamaynta culeysyada iyo isku-buuqyada.
- **Qaybta Naqshadaynta iyo Hogaaminta** - dhigaalada ama khayraadka bixiya tilmaamo loo adeegsanayo tixgelinta isku-buuqa iyo culeysyada si loo qaabeeyo loona joogteeyo nidaamyada.

Xirmo-qalabeedka Dhaqamada Daawayntu Salka u tahay waxa sidoo kale la socda afar cutub oo tababaro la diyaariyay lana ansixiyay ah oo ku saabsan mawduucyada isku-buuqa iyo culeysyada, xiriirada iyo isku xirnaanta, adkaydsiga iyo fayoqabka xirfadeed. Bilaash baad ku heli kartaa markaad u baahato, waxana loo dhigan karaa shakhsiyan ama kooxkoox. Raadi cutubyadan ku hoosjira qaybta 'Kheyraadyada' ee websaydka xirmo-qalbeedka.

## Barnaamijka Child Care Aware ee Minnesota wuxu bilaabay tijaabo carbin-shaqo oo cusub

Barashada xirfadaha loo baahan yahay si loo abuuro deegaan ay carruurta yaryari ku kobcaan kuna koraan keliya uma baahna aqoonta qaababka ugu fiican ee carruurta wax loo baro, laakiin waxay u baahan tahay in shaqooyinka fasalka toos gacanta loogu qabto. In qaybaha daryeelka ilmaha lagu soo kordhiyo istaraatijiyado carbin shaqo oo la soo tijaabiyay waxay barayaasha waxbarashada carruurnimada hore u sahlaysaa in xirfadaha bartaan iyagoo taageero ka helaya hage tababaran.

T.E.A.C.H Early Childhood Minnesota Apprenticeship Program wuxu taageeraa kobcinta xirfadaha baahida sare loo qabo ee dhanka waxbarashada carruurnimada hore. Marka la isugudaro shaqo, shaqo ku tababarasho, koorsooyin kuleej iyo hagitaan shaqsi ah, dadka ku jira carbiska shaqo waxay heli doonaan taageero dheeraad ah oo ay ku kasbadaan shahaadooyin iyo digriiyo la aqoonsan yahay oo waxay dhaqamadooda fiican ku dabaqi doonaan barnaamijyadooda waxbarashada carruurnimada hore.

Carbisyada shaqadu waxay bixiyaan furad macalimiinta cusubi ku guuleystaan, waxbarashada kuleejka ayay ka dhigaan mid la heli oo la iska bixin karo, waxayna macalimiinta siiyaan taageero dheeraad ah muddada shaqadooda iyo xirfadoodu bilowga tahay. Ka barnaamij daryeel ilmeed doonaya inuu qorto oo haysto shaqaale ahaan, shaqo-carbisku wuxu ku siinayaa fursad aad ku maalgasho macalimiin cusub iyo kuwa horey kuugu joogayba, taas oo si togan u saameynaysa carruurta ku jirta barnaamijka. Shaqo-carbiska tijaabada ah wuxu baadigoobayaa macalimiinta ka shaqeeya xarumaha daryeelka carruurta ee Minnesota ee ku jira heerarka hore xirfadooda barbaarinta carruurta, una diyaarka ah inay is qoraan (ama horeyba u dhiganayay) kuleej ku yaalla Minnesota, ee ugu yaraan 30 saacadood todobaadkii ka shaqeeya barnaamij daryeel carruurnimo hore shati haysta. Intaas waxa dheer, waxaanu raadinaynaa milkiilayaasha/agaasimayaasha xarumaha daryeelka ilmaha ee doonaya inay kafaalo qaatdaan shaqo-carbiska waxbarashada hal ama ka badan oo shaqaalahooda hadda u shaqeeya ah.

Fadlan Erin Young kala xiriireriny@childcareawaremn.org ama 651-290-9704 ext. 200 wixii macluumaad dheeraada ah amabooqo websaydkeena.

## Haa Seegin Dheefta Canshuureedka Carruurta ee cusub!

Xitaa qoysaska aan laga rabin inay soo xereeyaan canshuur celiska dakhliga ee Minnesota ayaa iyana codsan karaa dheefaha qiimaha leh ee Canshuuraha Minnesota. Dheefta Canshuureedka Carruurta (Child Tax Credit) waxay canshuurta ka fududaysaa dadka dakhligoodu ka hooseeya heer khaas ah. Adiga iyo qoysaska aad u adeegtoba waad heli kartaan lacagcelintan xitaa haddii aan canshuur la idinku lahayn.

**Waa maxay Dheef Canshuureedka Carruurta?**

Dheef Canshuureedka Carruurta cusub wuxu diyaar u yahay dadka reer Minnesota ee haysta carruur ka yar da'da 18 sannadood. Markaad xeraysato canshuur celinta Minnesota, waxaad u qalmi doontaa $1,750 ilmihiiba iyada oo aan wax xaddidaad ah lagu sameyn doonin tirada carruurta. Dheefta Canshuureedka Carruurta waa dhinmaysaa haddii dakhligaagu ka badan $35000 oo aad tihiin Dad isqaba oo canshuurta wada xeraysanaya ama $29,500 oo ah ciddii kale. Waxa la dhimayaa 12% ee dakhliga guud ama wadarta dakhliga, hadba kii badan labada.

**Sidee baan u dalban Karaa Dheef Canshuureedka Carruurta?**

Dheef Canshuureedka Carruurta waa diyaar laga bilaabo sannad canshuureedka 2023. Dadka Reer Minnesota ee u qalma waxay dalban karaan iyagoo isticmaalaya M1CWFC, Dheefaha Ilmaha iyo Qoysaska Shaqeeya ee Minnesota.

**Canshuur Diyaarin Bilaash ah**

Waxaad sidoo kale u qalmi kartaa adeega diyaarinta canshuur celiska oo bilaash ah! Tag http://www.revenue.state.mn.us oo sanduuqa raadinta ku qor canshuur diyaarin bilaash si aad u hesho adeegyada canshuur diyaarinta bilaashka ah ee kaa ag dhow.

## U wareegista Waaxda Canshuurta, Dhalinyarada, iyo Qoyska (Department of Children, Youth, and Families)

Sharciga lagu abuuray Waaxda Carruurta, Dhalinyada iyo Qoyska (Department of Children, Youth, and Families , (DCYF)) ee cusub waxa la ansixiyay 2023 iyadoo looga dan lahaa in carruurta bud-dhig u noqoto dowladda gobolka iyo in la isku duwo barnaamijyada ahmiyadda siiya carruurta iyo qoysaska. Xafiiska Fulinta DCYF waxa la daahfuray Luulyo 2023 si uu u bixiyo adeegyada maareynta mashaariicda, iskuduwista, iyo awood qorsheyn miisaaniyadeed, mid siyaasadeed, iyo mid maamul oo loogu talagalay kala guurka.

Illaa hadda, Xafiiska Fulintu wuxu kaalmo ka geystay taageerista dhowr go'aamo qorsheed oo DCYF salka loogu dhigayo, sida aqoonsashada qorshayaasha muddada gaaban ee xarunta, dhisidda qorsheyaal isku xireed, iyo inuu qorshe muddaysan ugu dhawaaqo wareejinta barnaamijka, iyo qaar kale oo badan. Jadwalka waxa ku jira:

- 1da Luulyo, 2024, marka DCYF ay yeelato guddooyime, barnaamijyo gaar ah oo ka tirsan Adeegyada Caruurta iyo Qoysaska ee Waaxda Adeegyada Aadamaha (Children and Family Services at the Department of Human Services, DHS), qaybta Adeegyada Waxbrashada Hore ee Waaxda Waxbarashada (Early Learning Services division from the Department of Education, MDE), iyo hawlaglada dhexe qaarkood ayaa u wareegi doona DCYF.
- 1da Jannaayo 2025, Help Me Connect oo ka tirsan Waaxda Caafimaadka (Department of Health, MDH) ayaa wareegi doona.
- 1da Luulyo 2025, qaybaha ku habboon ee daahfurnaanta iyo shatiyada ee Xafiiska DHS ee Kormeeraha Guud, deeqda waxbarashada bulshada ee dugsiga ka bacdi ee MDE, barnaaamijyada caddaalada dhalinyarada ee Waaxda Badqabka Dadwaynaha (Department of Public Safety), iyo halwaha kale dhexe ee haray ayaa wareegi doona.

Xafiiska Fulintu wuu sii wadi doonaa ahmiyad siinta dedaalada qorsheynta iyo halwaha iskuxirka si uu u hubiyo in codka Maamul Qabiileedyada, degmooyinka, adeegbixiyayaasha, qoysaska, jaalalka maxaliga ah, dugsiyada degmada iyo daneeyayaasha kale uga muuqdaan hay'adda cusub.

Ka hogaamiyayaal xiisaynaya oo ay saameynayso u wareegista DCYF ahaan, fikirkiinu waa u muhiim si ay u guuleysato hay'ad cusubi. Waxaad wararka cusub ee kalaguurka la socon kartaa adigooisqoraya si aad u hesho joornaalkeena billaha ah iyo adigoo soo booqanaya bogeena websaydka Xafiiska Fulinta DCYF. Fadlan fursadaha iskuxirka, talooyinka, iyo su'aalahaba kula soo wadaag Xafiiska Fulinta iimaylka dcyf.implementation.mmb@state.mn.us.

## Khayraadka qoysaska, carruurta iyo bixiyeyaasha

- Macluumaad dheeri ah oo loogu talagalay qoysaska, adeeg bixiyayaasha iyo bulshada
- Iga Caawi Inaan Ku Xirto
- Xafiiska Qareenada Adeegyada ee Bixiyayaasha Daryeelka Ilmaha ee Qoyska

## Su'aalo ma qabtaa?

IImayl u dir ccs.communications.DHS@state.mn.us wixii su’aalo ah.

## Wax jawaab celin ah ma haysaa?

Noo sheeg fikradahaaga ku saabsan warsidahan adiga oo buuxinaya ra'yi uruurin kooban. Jawaabahaagu waxay ka caawin doonaan gobolka inuu horumariyo xiriirka uu la leeyahay bixiyeyaasha xanaanada cunugga iyo barayaasha hore.